




INFEKSHINKA KAADIMAREENKA

Buug-yar oo loogu talagalay dadka waaweyn
iyo daryeelayaasha.

WAA MAXAY INFEKSHANKA KAADIDA?

infekshanka kaadida ayaa yimaada marka bakteeriyyada ee qayb kasta oo ka mid ah hanaanka kaadida ay sababto astaamo.

Haddii baaritaanka kaadidu uu muujiyo inaad qabtid bakteeriya laakiin aad si fiican u caafimaad qabto, ha welwelin, taasi waa caadi, oo antibiyootikada inta badan looma baahna. Si kastaba ha noqotee, infekshannada daran ee kaadida waxay halis ku noqon kartaa nolosha.



Kalliyuhu
waxay
sameeyaan
kaadida
Kaadiheystu
waxay
keedisa
kaadida
Kaadi-
marenka
wuxuu jirka
dibadiisa u
saaraa kaadida

MAXAAD SAMEYN KARTAA SI AAD UGA HORTAGTO INFEKSHANKA KAADIDA?

Miyaad cabtaa biyo kugu filan? Eeg midabka kaadidaada.



- Cab cabitaan kugu filan (6-8 koob) si aad maalin walba u kaadiso kaadi midabkeedu yahay cadaan khafiif ah, iyo si aad iskaga ilaaliso harraad, gaar ahaan xilliyyada kulul
- Iska ilaali inaad cabto cabitaano badan ee kuwa xumbada leh ama khamri badan
- Ma jirto wax faa'iido ah oo la xaqijiyey oo ay leeyihiin miraha karamberiga ama daawada shushubka ah ee uroon maal gasha kaadi-hayska
- Iska ilaali calool-fariisasho/dibirka Weydiiso talo haddii aad u baahato
- Si fiican oo joogta ah iskaga kantarool sonkorowga/cudurka sokorta

Jooji in bakteeriyyada mindhicirkaaga ay u gudubto kaadiheystaaada:

- U masax xubinta taranka dhanka dambe adigoo kasoo bilaawaayo xagga hore ka dib markaad isticmaasho musquusha
- Beddel suufka xubinta taranka lagu ilaayo oo nadiifi xubinta taranka haddii ay gaarto ciid
- Agagaarka xubinta taranka ha ahaato mar walba mid nadiif ah oo qalalan; ka ilaali saabuunta carafta leh
- Ku dhaq biyo ka hor iyo ka dib galmaada

**Kala hadal farmashiyahaaga arrimaha ku saabsan in laguu gudbiyo
dhaqtarka guud (GP-ga) ama daaweyn kale.**

WAA MAXAY CALAAMADAHA IYO ASTAAMAHADHAA AY TAHAY INAAD ISKA EEGTO?

II gaar ah ku fiiri astaamahan haddii aad qabto tuubada kaadi-haysta:

- Jarayn ama qarqaryo
- Heerkul sareeya ama hooseeya
- Xanuunka kelyaha oo aad ka dareento dhabarkaaga dhanka feeraha hoostooda ah



Calaamadaha cusub ama ka sii daraya ee infekshanka kaadida ee dadka oo dhan ah:

- Xanuun ama gubasho markaad kaadineyo ah
- Heerkul sareeya ama hooseeya
- Jarayn ama qarqaryo
- Deg-deg (dareemida baahida ah in si dhakhso ah lookaadiyo)
- Xanuun calooshaada hoose ah dhanka sare ee xubinta taranka
- Haysasho la'aan (isqoyid/isku-kaadin in ka badan inta caadiga ah)
- In la kaadiyo in ka badan sida caadiga ah
- Kaadida oo midab culeys ah leh, ama dhiig oo lagu arko kaadidaada
- Jahwareer, dabeeecadda oo isbedesha, ama cakirnaanta cagaha

IN KASTA OO JAHWAREERKA UU KEENO INFEKSHINKA KAADIDA, KA FIKIR WAXYAABAHA KALE OO KEENI KARA JAHWAREERKA

- Xanuunka
- Caloosha oo fariisata/dibirkha
- Hurdo xumo
- Niyad jab
- Cabid la'aanta biyo kugu filan

- Waxyeelada gaarka ah ee daawada
- infekshan kale:
 - Isbeddel ku yimaada hawl-maalmeedkaaga ama jawiga gurigaaga
 - Cunto xumo

Haddii aad u maleynesyid in aad qabtid COVID-19 fadlan booqo qeybta coronavirus ee GOV.UK iyo NHS si aad u hesho haghii iyo macluumaadkii ugu danbeeyey.

MAXAAD SAMEYN KARTAA SI AAD U DAREENTID FIICNAAN/REYSASHO?

- Cab cabitaan kugu filan si aad u kaadiso dhoor jeer maalintiiba, gaar ahaan xilliga hawada kulul
- U isticmaal kiniiniga parastamolka si joogto ah, ilaa 4 jeer maalin kasta si aad iskaga yareeyso qandhada iyo xanuunka.



- Ma jirto wax faa'iido ah oo la xaqijijey oo ay leeyihiin miraha karamberiga ama daawada shushubka ah ee uroon maal gasha kaadi-hayska
- Haddii aad ka walwalsan tahay inaad isqoydo/isku-kaadiso, arag dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada si aad ugala tashato
- Talo ka weydiiso farmashiistahaaga / daryeelahaaga
- Cab cabitaan kugu filan si aad isaga ilaaliso harraad oo ay kaadidaadana u noqoto mid midabkeedu caadiyahay

MUXUU FARMASHIYAHAGA / KALKAALIYAHAGA / TAKHTARKAAGU SAMEYN KARAAN?

- Haddii astaamahaagu ay u badan yihii in ay si iskooda ah u fiicnaadaan, waxaa laga yaabaa in lagu siiyo talobixin daryeel iyo xanuun baabi'iye.
- In ay ku faraan in aad cabto biyo badan
- In ay ku weydiyaan inaad keento muunada kaadidaada
- Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo daawa antibiyootiko ah oo aad adigu isticmaali karto haddii astaamahaaga aysan fiicnaanin ama aad bilowdo inaad ka sii darto



HAD IYO JEER KU KALSOONOW TALADA FARMASHIISTHAAGA / KALKAALISADAADA / DHAKHTARKAAGA EE KU SAABSAN ANTIBIYOOTIKADA

- Antibiyootikadu waxay noqon kartaa nolol badbaadiye loogu talagalay infakshannada kaadida
- Laakiin antibiyootikada looma baahna had iyo jeer haddii la arkaba astaamaha kaadida
- Waxyeelada gaarka ah ee ka dhalata isticmaalka antibiyootikada waxaa ka mid ah jirro, finan, matag iyo shuban; latalin raadso haddii aad ka walwalsan tahay

- Antibiyootikadu waxay saameeyaan bakteeriyyada ku jirta mindhicirkaaga, taas oo ka dhigi karta inay u adkaystaan antibiyootikada ugu yaraan hal sano
- Marwalba ka shaqeysii antibiyootikada, kaliya isticmaal marka dhakhtarkaagu / kalkaaliyahaaga kugula taliyo

GOORMA AYAAD CAAWIMAAD HELAYSAA:

Astaamahan soo socda waa calaamadaha suuragalka ah ee infekshanka halista ah waana in si degdeg ah qiimeeyn loogu sameeyaa:

La xiriir dhaqtarkaaga guud (GP-gaaga) ama la xiriir NHS 111 (England), NHS 24 (Scotland dial 111), qadka tooska ah ee NHS (Wales wac 0845 4647), ama dhaqtarkaaga guud (NI)

Jareyn, qarqaryo
iyo murqo xanuun



Dareemida
jahwareer,
hurdeysanaan ama
hadalka yabqan ah



Aan kaadineynin
maalintii oo dhan



Heerkulka wuxuu
ka sareeyaa 38°C
ama ka hooseeyaa
36°C



Neefsashada oo
dhib noqota



Xanuunka kelyaha
oo aad ka dareento
dhabarkaaga
dhanka feeraha
hoostooda ah



Dhiig muuqda ee
kujira kaadidaada



Maqaarka oo aad u
qabow



Astaamaha ayaa si zaa'id ah usii xumaanaya, ama aan bilaabin inay soo fiicnaadaan 2 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta la bilaabey isticmaalka antibiyootikada.

**Ku kalsoonow dareenkaaga, waydiiso talo-bixin haddii
aadan hubin sida astamaahaagu ay degdega ah u yihiin.**